



## Sima sufuuftiina, safka oo la simo salaada dhamaystirkeeda ayey ka mid tahay

Anas Binu Maalik Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: wuxuu yiri Rasuulka Ilaahey naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate-: "Sima sufuuftiina, safka oo la simo salaada dhamaystirkeeda ayey ka mid tahay."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatree- wuxuu dadka tukanaaya faray inay simaan safka, oo qaarba qaarka kale aanay ka horayn, simada safkuna waxay ka mid tahay salaada dhamaystirkeeda iyo kaamilnimadeeda, safka qaloocintiisuna waa khalad iyo nusqaan salaada lagu sameeyey.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3031>

النّجَاةُ الْخَيْرِيَّةُ  
ALNAJAT CHARITY



لجنة الدعوة الإلكترونية  
EDC E-Da'wah Committee